



Kaabista Kaalmada Cuntada Degdegga ah Su'aalaha Badanaa La Is-Weydiyo

DSHS waxay u direysaa kabitaan degdeg ah dadka helo caawimaada cuntooyinka (Lagu ansixiyay dhinaca kaarka EBT). Haddii aad heshay faa'ido gudaha Maarsa ama Abriil, waxaa laguu ansixiyay kabitaan degdega oo bil walba si looga dhigo tirada ugu badnaanta cabirka qoyskaaga. Hadeer kabitaanka degdega waxaa lagu kordhiyay faa'idooyinka Maajo oo waxaa dib loo eegaya si bil ku bil ku saleysan.

Maxay tani u dhacaysaa?

Golaha Aqalka hoose wuxuu ogolaaday kaalmo dheeri ah si dadka loo siiyo awood ay ugu soo gataan cunto badan. Tani waxay yareeyn doontaa tirada inta jeer ee ay dadka u baahan yihiin inay soo adeegtaan raashin. Waxay sidoo kale xadidi doontaa tirada dadka dukaamada ku jira waxayna hoos udhigeeysaa fursadda logu qaadi karo COVID-19.

Goormaan helayaa kaalmada dheeraadka ah?

Waxaad heleysaa kabitaanka Maajo taariiqda faa'idooyinkaaga caadi ahaan loogu ansixiyo kaarkaaga EBT.

Waxaan hadeer codsaday caawinta cuntada bishaan. Maheli doonaa kaalmo dheeraadka ah?

Haddii aad u qalantid caawinta cuntada, waxaad u heleysaa tirada faa'idada ugu badan oo cabirka qoyskaaga ah.

Waxaan horeba helaa tirada ugu badan ee faa'idooyinka. Maheli doonaa kaalmo dheeraadka ah?

Haddii aad hore u heshay tirada faa'idada ugu badan, ma heleysid faa'idooyinka cunto dheeraad ah.



Washington State
Department of Social
& Health Services

Transforming lives

Waa maxay tirada faa'idooyinka ugu badan?

| U qalma Qoyska Xubnaha | Ugu badan Faa'idada |
|-----------------------------------|------------------------|
| 1 | \$194 |
| 2 | 355 |
| 3 | 509 |
| 4 | 646 |
| 5 | 768 |
| 6 | 921 |
| 7 | 1,018 |
| 8 | 1,164 |
| 9 | 1,310 |
| 10 | 1,456 |
| Mid kasta oo Dheeraad ah | + 146 |

Waan u qalmaa Basic Food (Cuntada Aasaaska), laakin ma helo wax faa'idooyin ah. Maheli doonaa kaalmo dheeraadka ah?

Haa. Waxaad heli doontaa kaalmo dheeri ah oo ah qadarta ugu badan ee loogu talagalay tirada reerkaaga haddii aad caadiyan hesho \$ 0.



Washington State
Department of Social
& Health Services

Transforming lives

Waxaan helaa WASHCAP / caawimaada Cuntada Ku-meelgaarka / caawimaada Cuntada loogu talagalay dheefaha sogalootiga sharciga ah. Maheli doonaa kaalmo dheeraad ah?

Haa. Kaalmada dheeraadka ah waxay khuseeysa dhammaan barnaamijyada caawimaada cunada.

Waa meeqo kaalmada dheeraad ah ee aan heli doono?

Waxaad heli doontaa farqiga u dhexeeya kaalmadada caadiga ah iyo qadarta ugu badan ee loogu talagalay tirada reerkaaga. Tusaale ahaan:

Adiga iyo lammaanahaadaba waad shaqeysaan oo waxaad heshaan wadarta \$ 200 oo faa'idooyinka cuntada ee 10 ka Maajo. Qadarta ugu badan ee reer laba qof ah waa \$ 355. \$ 355 - \$ 200 waa \$ 155. Waxaad heli doontaa \$ 155 dheeraad ah oo ku aadan kaalmada degdegga ah.

Waxaad heleysaa \$200 taada oo caadi ah iyo \$ 155 dheeraad ah oo wadarta \$ 355 ee taariiqdaada joogtada ah, Maajo 10.

Ma inaan dib u bixiyaa kaalmadaan?

Kuwani waa kaalmooyin dheeraad ah oo loogu talagalay isticmaalkaaga. Ma jirto sabab keenayso inaad dib u bixisid.

Miyaan luminaya faa'idooyinkaan dheeraadka ah haddii aanan islamarkaas isticmaalin?

Maya. Waxaa laguu ogolyahay 365 maalmood ka bilow taariiqda ugu dambeysay ee howsha kaarkaaga si aad u isticmaashid faa'idooyinka dheeraadka ah oo joogtada ah.

kaalmooyinkaan dheeraadka ah miyey saameyn ku yeelan doonaan xaaladdayda sooglootinimada?

Maya.

DSHS miyey bixineysaa tirada ugu badan Maajo kadib?

Dib ayaan u eegeynaa haddii aan ku siin karno tirada ugu badan oo cabirka qoyskaaga oo bil ku bil ku saleysan, iyadoo xirantahay ansixinta faderaalka.



Washington State
Department of Social
& Health Services

Transforming lives

Meeqo qof ayaa heli doona kaalmo dheeraad ah?

Sida ku saleysan kaabista degdega ee lagu ansixiyay gudaha Maarsio iyo Abriil 2020, DSHS waxay saadilneysaa bixinta faa'idooyin dheeraad ah oo qiyaastii 283,000 qoys gudaha Maajo.

Waa maxay celceliska lacagta kaalmada dheeraadka ah?

Guud ahaan gobolka, celceliska qaddarka dheeraadka ah ee qoyskiiba waa \$ 170. Qoysaska qaarkood ayaa heli doona waxbadan, qaarna wax kayar.

DSHS ma ii soo diri doontaa warqad markaan helo kaalmada dheeraadka ah?

Maya. Ma direeyno waraaqo markaan bixinayno kaalmooyinka dheeraadka ah. Haddii aad rabto inaad ogaatid goortii faa'idooyinkaaga ay soo galaan koontadaada, waxaad wici kartaa lambarka ku qoran kaarkaaga EBT si aad u hubiso haraagaaga ama isticmaal Client Benefit Account (Koontada Faa'idada Macmiilka) ee www.washingtonconnection.org.

Miyaan wacaa Xarunta Xiriirka Adeega Macmilka?

Sababo laxiriiro tirada wacitaanada oo kabadan maalmaha caadiga ah, waxaan kaa codsaneynaa inaadan uwicin xarunta wicitaanka wax ku saabsan kaalmada dheeraadka ah. Hubi warbixinta ugu dambeysuo oo akoonadeena warbaahinta bulshada ee [Facebook](#) iyo [Twitter](#) ama oo www.dshs.wa.gov.